

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA <i>E-mail: Faafintagaryaqaanka@gmail.com</i>		
Sanadka: 6aad	Cadadka: 3aad ee March	Taariikh: 01/04/2017
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.</i>		

TUSMADA CADADKA

<p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANIYADDA QARANKA:</p> <p>1) SOOMA BIXIN</p> <p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER MADAXWEYNE:</p> <p>1) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0765/032017 Cafis Madaxweyne 198</p> <p>2) <u>XEER MADAXWEYNE</u>, Lr: 0772/032017 Magacaabid 199</p> <p>3) <u>XEER MADAXWEYNE</u>, Lr: 0773/032017 Magacaabid 200</p> <p>4) <u>XEER MADAXWEYNE</u>. Xil ka-qaadis 202</p> <p><u>QAYBTA SADEXAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIJOYINKA DOORASHOYINKA & BARNAAMIYADA DAWLADA:</p>	
--	--

5) SOOMA BIXIN

QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:

6) SOOMA BIXIN



QAYBTA SHANAAD: AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:

- | | |
|--|-----|
| 7) Amar Baahin Qaraar
<u>Maxkamadda Degmada Hargeysa</u> | 204 |
| 8) Diiwaan Gelin Shirikada Critical Operation
Group Somaliland,
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | 206 |
| 9) Diiwaan Gelin Shirikada Aden General
Gemstones,
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | 207 |
| 10) Diiwaan Gelin Shirikada Smoothtel & Data
Solutions,
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | 208 |
| 11) Diiwaan Gelin Milk Care Corporation
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | 210 |
| 12) Diiwaan Gelin Shirikada Guleid Clearance and
Forwarding,
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | 211 |
| 13) Diiwaan Gelin Shirikada I Dhamac Investment
Consultant Firm,
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | 213 |
| 14) Diiwaan Gelin Shirikada Baabusalaam General
Trading and Bookshop LTD,
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | 214 |
| 15) Diiwaan Gelin Shirikada Berbera International
Container Repairing & Maintenance,
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | 215 |
| 16) Diiwaan Gelin Shirikada Uroda Cosmetics,
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | 217 |
| 17) Diiwaan Gelin Shirikada Suldan Madar General
Trading
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | 218 |

QAYBTA LABAAD:

XEER MADAXWEYNE:

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



REPUBLIC OF SOMALILAND

XAF. MADAXWEYNE KU-XIGEENKA

OFFICE OF THE VICE-PRESIDENT



THE VICE-PRESIDENT

JSL/VP/WM/04-00286/032017

DATE....07/03/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0765/032017

Cafis Madaxweyne

Madaxweyne Ku-xigeenka JSL ahna ku simaha Madaxweynaha JSL

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xubintiisa
5aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka
Ciqaabta Guud;

Markuu La tashaday: Masuuliyiinta ay arintani
khuseyso;


Markuu Tixgeliyay: Codsiga cafiska ah ee Suldaan
C/qani X. C/laahi Maxamed;

Wuxuu Go'aansaday

In laga bilaabo taariikhda manta uu cafis gaar ahaaneed ufdiyo Suldaan C/qani X. C/laahi Maxamed, oo qaranimada Somaliland ka soo horjeeday in muddo ah.

Allaa Mahad Leh,

Eng. C/raxmaan C/laahi Ismaaciil (Saylici)
Madaxweyne Ku-Xigeenka JSL ahna Ku-simaha
Madaxweynaha.



REPUBLIC OF  **SOMALILAND**
THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4619/032017

DATE...23/03/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0772/032017

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad faqradiisa
3aad xarafka (j) ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay:

Ahmiyadda ay Hay'ada
Shaqaalaha Dawladu u
leedahay Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiye ku xigeenka Hay'ada Shaqaalaha Dawlada;

Markuu ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Cabdirkariim Maxamed Xaaji Cali, laga bilaabo taariikhda maanta oo ahaado Guddoomiye ku-xigeenka Hay'ada Shaqaalaha Dawlada ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4621/032017

DATE...23/03/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0773/032017

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Guddoomiyayaasha Goballadu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Aqoonsadey: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiyaha Gobolka Badhan;
- Markuu ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Cali Xuseen Maxamed, laga bilaabo taariikhda maanta oo ahaado Guddoomiyaha Gobolka Badhan ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF

SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XILQ/249/1-4620/032017

DATE...23/03/17

Ku: Mudane, Maxamuud Cabdillaahi Xarbi,
Guddoomiye Ku-xigeenkii Hore ee Hay'adda
Shaqaalaha Dawladda Hargeysa

Og: Guddoomiyaha Hay'ada Shaqaalaha
Dawlada Hargeysa

Ujeeddo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxaan aad kuugu mahadinayaa Muddadii aynu wada shaqeynaynay. Xilalka Qaranka ay dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darted, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'ada Shaqaalaha Dawlada ee Jamhuuriyada Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa inaad si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Cabdirkariim Maxamed Xaaji Cali, oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Sidoo kale, waxaan farayaa Guddoomiyaha Hay'ada Shaqaalaha Dawlada oo ay warqadani ogeysiin ugu socoto, in uu labada Masuul u kala wareejiyo xilka Guddoomiye ku-xigeenka Hay'ada Shaqaalaha Dawlada ee Jamhuuriyadda Somaliland.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SHANAAD:

AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Maxkamdda Degmda Hargeisa



MDH/J/DFL/1652/2016

Date: 22/02/2017

Ku: - Agaasimaha Guud ee daacada Radio JSL Hargaysa

Og: - Garyqaanka Guud ee Qaranka JSL Hargaysa

Ku: - Wargeysyada Madaxa Banaan ee Hargaysa

Ujeedo: - Amar Baahin Qaraarka Sumadiisu tahay MDH/

Markay Aragtay:

Gal-Dacwadeedka madaniga ah ee sumadiisu tahay MDH/DML/ADH/1652/2016 ee 07/11/2016 ujeedadiisu tahay dacwad dhaxal kana dhaxeeya Dhinacyada kala ah: -

Dacwoode: Aamina Ibraahim axmed

Wakiil u yahay Faarax Muuse Maxamed

Dacweysane: - Sahra Ibraahim Axmed

Markay Aragtay: -

Qodobka qodobka 81 XHM

Hadaba Maxkamadda Degmadu waxay idin ku amraysaa in aad noo baahisaan Qaraarka hoos ku qoran waana sidan hoos ku qoran: -

Qaraarkii Maxkamadda

1) Maxkamadda Degmada Hargeysa waxay Qaraarisey Dhaxal qaybinta Culimada ee ku taariikhaysan 20/02/2017, ee ku salaysan tarakada Marxuum Ibraahim Axmed Jaamac oo ka tagay Hal jago oo ku taala Degmada Axmed Dhagax gaar ahaan Xaafada Axmed Gurey.

2) Dacwooto Aamina Ibraahim Axmed oo wakiil u yahay Faarax Muuse Maxamed, waxay ka heshay Lacag dhan 5000\$USD (Shan kun oo Doolar) oo ku Slaysan qiimaynta jagada.

3) Dacweysantu Sahra Ibraahim Axmed waxay ka heshay lacag dhan 5000\$ USDolar (Shan kun oo doolar) oo ku salaysan qiimeynta Jagada.

4) Qaraarkan waxa loo cuskaday shareecada islaamka iyo qodobada sare ku xusan.

5) Qaraarkani wuxuu soo baxay manta oo ay taariikhdu tahay 25/02/2017.

Ilyas Da'uud Ibraahim

(Garsooraha Maxkamadda Degmada Hargeisa)

C/qaadir Muxumed Xuseen

Kaaliyaha Maxkamdda Degmada Hargeisa

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/39/2017.

19/02/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargaysa

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

(Sole Proprietorship)

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, **CRITICAL OPERATION GROUP SOMALILAND.**

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu ay saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **CRITICAL OPERATION GROUP SOMALILAND, Astaanteeduna tahay:** - (COG SOMALILAND), shaqadeeduna tahay Saad siinta iyo bixinta adeegyadda hoteelada (Logistics and hotel servies), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 19/02/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.



JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/40/2017.

15/02/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.


Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, ADEN GENERAL GEMSTONES. Oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad(2)(a) Somaliland Compony Law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland. Saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.



Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan yahay shirkada magaceedu yahay **ADEN GENERAL GEMSTONES, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Baadhista Macdanta (Mining) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 16/02/2017.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/42/2017.

22/02/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargeysa.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, SMOOTHTEL & DATA SOLUTIONS, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2)(a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.Y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **SMOOTHTEL & DATA SOLUTIONS, Astaanteeduna tahay:** - (Shimbiir ku dhex jirta map, magaca shirkaduna ku hoos qoran yahay), shaqadeeduna tahay Bixinta adeega ICT (ICT Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/02/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/43/2017.

22/02/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargaysa

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, MILK CARE CORPORATION, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2)(a) Somalind Company law.


Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **MILK CARE CORPORATION**

Astaanteeduna tahay: - (Xarfaha MCC), shaqadeeduna tahay soo Dejinta (Import) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/02/2017.



Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/44/2017.

22/02/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.


Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, GULEID CLEARANCE AND FORWARDING, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2)(a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.



Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, **GULEID CLEARANCE AND FORWARDING Astaanteeduna tahay:** - (Magaca Shirikada), shaqadeeduna tahay Rarita iyo Dejinta (Clearance and Forwarding), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/02/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/86/2017.

19/03/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, I DHAMAC INVESTMENT CONSULTANT FIRM.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland,

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay **I DHAMAC INVESTMENT CONSULTANT FIRM, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Bixinta adeega la talinta xaga ganacsiga (Business Consultancy), xarunteeduna tahay Magaaladda Burco, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 19/03/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/89/2017.

22/03/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, BAABUSALAAM GENERAL TRADING AND BOOKSHOP LTD, Oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **BAABUSALAAM GENERAL TRADING AND BOOKSHOP LTD, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay soo dejinta Buugaagta (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/03/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/88/2017.

22/03/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay
Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay,
BERBERA INTERNATIONAL
CONTAINER REPAIRING &
MAINTENANCE.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan
yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer
NO.25/2004 Company Act of
Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu
saxeexay sida uu qabo qodobka
11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay
shirkada magaceedu yahay **BERBERA INTERNATIONAL
CONTAINER REPAIRING & MAINTENANCE,**
Astaanteeduna tahay: - (Magaca shirkada),
shaqadeeduna tahay hagaajinta Containers (Container
Repairing and Maintenance), xarunteeduna tahay
Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay
taariikhdu tahay 22/03/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/90/2017.

22/03/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaan geliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, URODA COSMATICS.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **URODA COSMATICS**, **Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Dejinta allaabooyinka (Import),

xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/03/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)



Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/93/2017.

25/03/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.


Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaan geliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, SULDAN MADAR GENERAL TRADING.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.



Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **SULDAN MADAR GENERAL TRADING, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay soo dejinta shidaalka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 25/03/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.